





# Qaybta daweynta caruurta · Barnmedicin

## Qaaxada qarsoon

### Latent tuberkulos

#### Magaca Namn

	<p>Waxaa lagu qaadsiiyey bakteeriyada/jeermiska keen cudurka qaaxada. Qaaxadu waa cudur aad caadi ugu ah dunida oo dhan.</p> <p>Du har blivitt smittad av tuberkulosbakterier. Tuberkulos är en mycket vanlig infektion i världen.</p>
	<p>Waxaa ku haya nooca lagu magacaabo qaaxada qarsoon (latent tuberkulos). Taas oo ay macnaheedu tahay in bakteeriada ama jeermisku jidhkaaga ku jiro, laakiin uu yahay mid nasanaya ama jiifa. Ma xanuunsanid/jiranid islamarkaan ma qaadiin kartid cid kale.</p> <p>Du har det som heter latent tuberkulos. Det innebär att du har bakterierna i kroppen men de är vilande. Du är inte sjuk och du kan inte smitta någon annan.</p>
	<p>Waxaa jirta halis ah in cudurku gadaal ka qarxo, kaas oo markaa noqonaya mid aad khatar u ah.</p> <p>Sidaa awadeed waxaa aan ku talineynaa in aad qaadato daawada ka hotaga nooca qaaxada ee jiifa (latent tuberkulos) <b>mudo saddex bilood ah.</b></p> <p>Det finns risk att sjukdomen bryter ut senare, och den kan då bli allvarlig. Därför rekommenderar vi att du genomför behandlingen mot latent tuberkulos under <b>tre månader.</b></p>
	<p>Waxaa u noolaan karta si caadi ah islamarkaana u sameyn kartaa tababar, u tegi kartaa dugsiiga ulana kulmi kartaa saaxiibadaa mudada ay dawadu socoto.</p> <p>Du kan leva som vanligt och träna, gå i skolan och träffa kompisar under behandlingen.</p>

# Qaybta daweynta caruurta · Barnmedicin

## Daaweynta


## Behandling

	<p>Waxaa lagu siin doonaa dawooyinka hoos ku xusan:</p> <p>Du ska ta följande mediciner:</p> <p>Tibinide ..... mg ..... tablett en gång varje dag/ kiniin hal mar maalin kasta</p>
	<p>Rimactan ..... mg ..... kapsel en gång varje dag/ kaabselka hal mar todobaadkiiba</p>
	<p>Waxaa aad daawada qaadan doontaa subax kasta. Fadlan sug markaa in aad cunto qureecda ugu yaraan saacad.</p> <p>Du ska ta mediciner varje morgon. Vänta minst en timme med frukost.</p>
	<p>Aad bey muhiim u tahay in aad xasuusatato qaadashada daawada. Haddii la ilaawo/hilmaamo in qaadato dawada waxaa suurogal noqon karata in bakteeriyada la qabsato dawada taasoo keeni karta in daawadu waxba ka tari weydo.</p> <p>Det är mycket viktigt att komma ihåg medicinen. Om man glömmer kan bakterierna bli mindre känsliga för medicinerna.</p>
	<p>Waxaa aad kiniinada qaadan kartaa inta u dhaxeysa saacadaha 6<sup>da</sup>-10<sup>ka</sup>. Marakaad qaadato daawada waa in aad mar kasta sugtaa in aad qureecato ugu yaran saacad.</p> <p>Du kan ta tablettarna någon gång mellan kl. 6 och 10. Oavsett när du tar dom måste du alltid vänta minst 1 timme med frukost.</p>

## Qaybta daweynta caruurta · Barnmedicin

### Macluumaad ku saansan dhibaatooyinka ay keento daawadau






#### Information om biverkningar

	<p>Waxaa ay daawada u yeesha kaadida midab cas (guduud)/oronjo ah. Laakiinse wax dhiba ma leh.</p> <p>Medicinerna färgar urinen röd/orange. Det är ofarligt.</p>
	<p>Waxaa la dareemi karaa daal, calool xanuun iyo yalaalugo/labo-labo. Dhibaatooyinkaasi wey ka tagaan qofka inta badan. Waxaa kale oo dhici karta in jidhku ku cuncuno islamarkaana finan ka soo baxaan.</p> <p>Man kan bli tröttare, få ont i magen och bli illamående. Dessa besvär går oftast över. Man kan också få klåda i huden och utslag.</p>
	<p>Haddii ay dhibaatooyin badan kula darsaan waxaa aad la xidhiidhi doontaa kalkaalisada caafimaadka ee qaybta qaabilaada si ay qiimeyn kuugu smayso.</p> <p>Om du får mycket besvär ska du ta kontakt med sjuksköterska på mottagningen för bedömning.</p>
	<p>Aad bey muhiim u tahay in la qureecto subax kasta. Waxaa sidaa kaaga yaraanaya khatarta ah in ay calooshu ku xanuunto, islamrakaana daawadu kuu keento yalaalugo/labo-labo.</p> <p>Det är viktigt att äta frukost varje dag. Då är det mindre risk att du får ont i magen och blir illamående av medicinerna.</p>

# Qaybta daweynta caruurta · Barnmedicin

## Hubinta

### Kontroller

	<p>Fadlan waa in aad booqataa kalkaalisada cafimaadka <b>2 todobaad</b>; ka dib marka lagaa qaado kaadida iyo dhiigga.</p> <p>Besök hos sjuksköterska efter <b>2 veckor</b>; urinprov och blodprov.</p>
	<p>Fadlan waa in aad booqataa kalkaalisada cafimaadka <b>6 todobaad</b>; ka dib marka lagaa qaado kaadida iyo dhiigga.</p> <p>Besök hos sjuksköterska efter <b>6 veckor</b>; urinprov och blodprov.</p>
	<p>Booqashada gababda ee loogu tagayo dhakhtarka <b>3 bilood</b> ka dib daaweynta. Dhakhtarkaaga magciisu waa .....</p> <p>Avslutande besök hos läkare efter <b>3 månaders</b> behandling. Din läkare heter .....</p>
	<p>Waxaa aad naga soo wici kartaa labarka telefoonka ..... Haddii aad qabto wax su'aal ah ama ay dhib kula soo daristo.</p> <p>Du kan ringa oss på telefonnummer ..... om du har frågor eller problem.</p>
	<p>Haddii aad si lama filaan ah u bilowdo in aad u qufacdo, xumad ama qandho ku qabato, rabitaanka cuntadu kaa tago, islamarkaana miisaankaaga jidhku hoos u dhaco waa in aad nala soo xidhiidhaa.</p> <p>Om du plötsligt får mycket hosta, feber, aptitlöshet och viktnedgång ska du höra av dig till oss.</p>